

# Hagaha guryeynta qaxootiga jooga Scotland



scottish  
refugee  
council

## Sida aan u kaalmayn karno

Abril 2011

Housing - how we help - Somali

### Kooxdayada u Guryeynta Qaxootiga

Haddii aad fasax ku joogto UK, waan ku caawin karnaa si aad u doorato noocyada guryeynta aad rabto iyo in aad xaliso dhibaataada guryeynta.



### Waa maxay kaalmada aad isiin kartaa?

Waannu kaa siin karnaa macluumaad iyo talo xuquuqdaada guryeynta waxa kale oo aan kaa caawin karnaa arrimaha soo socda:

- hooy la'aanta
- xaqa aad u leedahay guryeynta
- sidaad uga dalban lahayd golaha ama ururka guryeynta hooy
- ka kireysashada maal qabeen gaar ah
- la tacaalidda isir dhibidda
- la tacaalidda dagaalka hooyga
- buuq iyo urur xad dhaaf ah
- dhibaatooyin dayactir
- u guurista meelo kale oo ka mid ah Scotland
- u guurista meelo kale oo ka mid ah UK, sida England iyo Wales
- kirada ururta – waxaad samayn lahayd haddii aad ku bixin kari weydo kiradaada wakhtiga lagu talagalay in lagu bixiyo
- Faa'iido Guryeyn iyo Gunnada Guryeynta Maxaliga ah
- Dhibaatooyinka deriska
- Bilaabista kireysasho cusub

## **Waxaanu sidoo kale bixinaynaa macluumaad kooxeed iyo fadhiyada talada**

Macluumaadka fadhiyada kooxda waxa lagu qaban doonaa bill kasta xafiiskayaga 5 Cadogan Square ee Glasgow. Fadhiyada talada waxa ku jira talo iyo macluumaad ku saabsan:

- Ikhtiyaaro guryeyn - waxay sharaxdaa xuquuqdaada guud marka aad fasax ku joogto UK
- Hoy la'aan - waxay caddaysaa xuquudaada, ikhtiyaaradaada iyo waxay tahay inaad rajayso
- Ururad guryeynta - waxay sharaxdaa waxa ay yihiin ururada guryeyntu iyo sida loo codsado guryayn adoo adeegsanaya urur
- Kiraysi cusub - waxay caddaysaa xuquuqdaada, masuuliyadahaaga iyo halka aad ka helaysid alaab guri si aad u qalabayso gurigaaga cusub
- Kiraynta gaarka ah - waxay sharaxdaa waxa looga jeedo kiraynta gaarka ah waxay ay tahay inaad tixgaliso kahor kiraysiga gaarka ah

Macluumaad dheeraada oo ku saabsan fadhiga xiga ee la wakhtiyeyey ee kooxdayada waydii mid ka mida xubnaha shaqaalahayaga ee xafiiskayaga jooga ama garaac 0800 085 6087.

### **Sida meel looga qabsado fadhiga kooxda**

Si aad meel uga qabsato fadhiyada kooxda garaac tilifoonkayaga bilaashka ah 0800 085 6087 ama la hadal mida ka mida shaqaahayaga xafiiska. Garaacidu waa bilaash laynka laakiin maya moobilada.

Boosasku way xaddidan yihiin waxayna ku salaysan yihiin imaashaha hore, adeegga hore. Si kastaba, haddii fadhigu buuxo, waxaad meel ka qabsan kartaa fadhiga xiga.

Haddaad u baahan tahay tarjumaan, fadlan waydii marka aad meesha qabsanayso.

Nasiib xumo ma lihin xarumo carruurta lagu xannaaneeyo.

### **Sida la noola soo xidhiidhayo?**

Waxa jira laba siyaabood oo aad u noola soo xidhiidhi karto:

1. Ballan qabso si aad noogu aragto xafiiskayaga weyn adiga oo soo garaacaya lambarkan: 0800 085 6087 – wixcitaankani waa bilaash telefoonada badi, laakiin aan ahayn kuwa gacanta. Waxaan kaa qaadan doonaa xoogaa macluumaad ah dibna waanu kuu soo wici si aan ballan u qabanno.
2. Ballan qabso si aad noogu aragto Xarunta Rosemont Lifelong Learning Centre, adiga oo soo wacaya lambarkan: 0141 552 3090. Ballanada Rosemount waxa loo helaa oo keliya Arabaca dhaaf kasta.